

Qof kastaa xuquuq aasaasiya ayuu ku leeyahay wadanka Maraykanka. Mar kasta waa inaad xasuusnaataa inaad leedahay xuquuq khaas ah- iyadoon la eegin qaabka sharciga aad ku joogto dalka.

Qeybaha soo socoda ayaa ka hadlaya xuquuqdaada aasaasiga ah, marka aad u codsanayso adeegyo ama barnaamijyo naftaada iyo qoyskaaga, iyo waliba xuquuqdaada madaninimo marka aad la macamilayso dadka awooda haya sida Boliska ama saraakiisha Laanta Socdaalka INS:



Marka aad daryeel ka codsato xafiiska Adeegyada Bulshada waxaad xaq u leedahay...

- Inaad gudbisato codsi daryeel, xataa haddii lagu sheego in aanad xaq u lahayn. (Mararka qaar ayaa warka aya shaqaalaha xafiisku hayaan yahay mid qalad ah ama la bedelay).
- Inaad racfaan qadato ama aad codsato dhexdhexaadin, haddii aad is tiraahdo qalad ayaa laguugu diidan kaalmada.
- In codsigaaga ama dhexdhexaadinta laga dhammayn karo telefon haddii aad guriga ku xayiran tahay.

Haddii aadan Af Ingriiska ku hadal...

...oo aad codsanayso kaalmo ama adeeg caafimaad ama kaalmo...

- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho turjumaan lacag la'aan ah.
- Waxa kale oo aad xaq u yeelan kartaa inay goob caafimaad ama isbitaal, ama xafiiska daryeelku qoraallo ku turjuman luqadaada, taasoo ku xiran hadba tirada dadka ku hadla luqadaas ee deggan Santa Clara County.
- Haddii aad heli waydo qoraallo luqadaada ah, waxaad xaq u leedaay in lagugu fahamsiiyo luqadaada kharash la'aan.

Haddii aadan sharci

- Waxaad haddana xaq u leedahay daryeelka qaarkiis.
- Waxaad u codsan kartaa dadka qoyskaaga ka tirsan ee xaqqa u leh daryeelka.
- Ma aha inaad qofna u sheegto qaablka sharci ee aad ku joogto. Haddii aad u codsanayso qof ka tirsan qoyskaaga ma aha inaad cid tusto warqadahaaga sharci. Haddii cidi ku lagu weydiiso, ku dheh "Anigu xaq uma lihi."

Marka aad la macamilayso saraakiisha, sida Boliska iyo Laanta Socdaalka (INS)...

- Inaad xaq u leedahay inaad qareen hesho inta aadan su'aalaha ka jawaabin ama aadan wax dukumentii ah saxeejin.
- In lagu hor geeyo xaakin sharciga socdaalka qaabilsan.
- Inaad xaq u leedahay inaad heshid qareen kaa difaaca ama kula jooga marka lagugu waraysanayo laanta socdaalka. (Hase yeeshe xaq uma lihid qareen ay dawladdu kaa bixiso khaarashkiisa.)
- Waxaad xaq u leedahay inaad codsato in xayiraada (detention) lagaa sii daayo. Adigoo bixinaya lacag damaand ah.

Garo Xuquuqdaada!!!

Waa inaad suktid xuquuqdan.

Haddii aadan codsanay xuquuqdan, ogsoonaw

- In lagu celin karo adigoon lagu horgeyn xaakin ama aan qabsan qareen.
- Xaaladda noocaas ah oo aad kaaga baxdo dalka Maraykankuwaxay keeni kartaa inaad bid ugu soo noqon kari weydo mar dambi dalka ama aad sharci ka heshid.
- La tasho qareen ku shaqeeya hawlaha socdaalka inta aadan dalka Maraykanka ka bixin..



**Ku dhaqan
xuquuqdaada...**

Halkan waxa ku yaal laba qoraal oo aad goosan karto. Waxay yihiin:

1. **Qoraalka lagu heli karo luqadda aad taqaan.** Waxaad tusi kartaa cidda adeegga ku ssinaysa, sidqa shaqaalaha caafimaadka, DMV, Xafiiska Adeega Bulshada iyo meelaha aad daryeel ka codsanayso oo dhan.
2. **Qoraalka Xuquuqda madaniga.** Waxaad tusi kartaa qoraalkan saraakiisha Boliska, Laanta socdaalka (INS). Marka aad qoraalka tusto xaq ayaad u leedahay inaad iska aamusnaato oo aad qareen dalbato.

Qof kastaa wuxuu mudan yahay xaqna u leeyahay in lagu dhaqo xurmayn ayadoon loo eegin qaabka sharci ee uu dalka ku joogo.

Gooso qoraaldan oo ku hayso mar kasta boorsada.

Qoraalka xuquuqda Af-celinta ee dadka hayaanka (socotada) ah.

Haddii aadan ku hadli kara Af Ingriis dhib qoraalkan:

- Tus qoraalkan shaqaalaha deeqda daryeelka (eligibility worker) cafimaadka iyo wakaaladda aad adeegga ka heshid
- Qoraalkani wuxuu sharxayaa inaad u baahan tahay turjumaan ood xaqna u leedahay in luqadaada luguugu sheego..
- *Sharciga California ayaa arrintaan cadeynaya*

To Whom It May Concern:

I am handing you this card because I need to access a service here, and I do not speak English well enough to understand you. Please be informed that I am exercising my right to an interpreter and that I wish to have one as soon as possible. I am also requesting written information and forms (Please fill in the language here)

I will refuse to sign anything or undergo any procedure without full explanation of what I am signing or undergoing.

Thank You.

Qoraalka xaq dadka socotada ah

Garo xaqaga!!

Haddii ay laanta socdaalku ku xayirto ama Boliiku af Ingriisna aadan aqoon:

- U dhiib sarkaalka qoraalkan magacaaga seeg iskana aamusnow.
- Qoraalkan ayaa faahfaahin ka bixinaya inaad isticmaalayso xuquuqda ah inaad diido karto jawaab inaad bixiso inta aad qareen kala kulmayso.

To Whom It May Concern:

I am handing you this card because I do not wish to speak with you or have any further contact with you. Please be informed that I choose to exercise my right to remain silent and to refuse to answer your questions. If I am detained I request that I immediately be allowed to contact an attorney. I will exercise my right to refuse to sign anything until I am allowed to speak to my attorney.

Thank you.